

Car Seats Made Simple



Liiska Warbixinta Rakibidda 5aad: Suunka Lagu Toosinayo Kursiga Kor Loo Qaaday

Muhiim: Kan waa liiska warbixinta guud oo loogu talagalay si wadajir ah in lala isticmaalo diiwaanka gaarigaaga iyo kursiga kor loo qaadyo oo la socda diiwaanka kursiga. Si aad u dadajisid waxtarka liiska warbixinta kaasho oo hadba isha mari diwaanadaas.

Minnesota sharcigeeda kursiga waxa uu u baahanyahay in canug ka yar 8 sano iyo ka gaaban 4 cagood iyo 9 inji, labadaba, in lagu adkeeyo kursiga ammaanka gaariga ama kursiga kor loo qaadayo. Wixii sharcigan hoosimaada, canugga kaligii kuma uu fariisan karo isaga oo suunka gaariga kaliya isticmaalaya illaa uu ka gaaro 8 sano ama 4 cagood iyo 9 inji dherar ah — hadba kii soo hormara. Haddii lagula soo taliyay in ilmaha lagu hayo kursiga kor loo qaadayo taaso ku xiran culayskooda, halkii da'aaddooda loo eegi lahaa. (Ka eeg buugga tasmada ama calamaadaha ku qoran kursiga ammaanka ilmaha si aad ku habsato haddii uu yahay kii ku haboonaa ilmahaaga culayskiisa iyo jooggiisa.)

Kuraasida kor loo qaadayo waxaa isticmaala caruurta ka weynaaday kursiga gaariga ee sumaanka leh. Caruurta badankooda oo da'doodu ka yartahay sideed sanadood aad uma wayna oo wali ma la eka sumaanka gaarigu. Waxaaba surtagal inay ku dhaawacmaan suunka haddii uu shil dhaco. Kursiga kor loo qaado ayaa ammaanka suunka si quman ugu saxayo jirka caruurta. Sawirka kursiga kor loo qaadayo waxay ku caawinaysaa in suunka dhabta mara uu hoos uga dhaco simaha iyo suunka garbaha ee ku dadban xabadka (halki uu ku dadban lahaa qoorta). Waxayna caruurta siinayaan waasacnimo: salka kor loo qaaday waxay u ogolaanaysaa inay si fiican wax u arkaan iyo inay lugahooda ay si caadi ah u laabaan. Waxaa jira laba nooc ee kursiga kor loo qaado: Mid dhabarka u dheer iyo Mid aan dhabar lahayn.

Kursiga kor loo qaaday oo aan dhabarka lahayn (waxaa la isticmaali karaa haddii uu gaariga leeyahay wax madaxa celiya).



Kursiga kor loo qaaday oo dhabarka leh (caadi ahaan lala isticmaalo ama aan lala isticmaalin waxa madaxa celiya, eeg diiwaanka kursiga).



1) Xaqiijiso in kursiga gaariga uu yahay mid sax u ah joogga iyo culayska cunugaaga.

Kursiga dhabarka leh iyo midka aan dhabarka lahayn waxaa loogu talagalay caruur weynaatay ee k u xiran kursiga gaariga laakiin haddana aan sida u weynayn si ay u xirtaan suunka dhabta ee gaariga iyo suunka garabka. (Shirkadaha way ku kala duwanyihiin xadka, eeg magaca hoose ee ku yaalla kursiga kor loo qaado si aad u heshid xadkaqaaska u ah.) Kursiga kor loo qaado isticmaal illaa uu cunuga gaaro xadka culayska ama ka gudbay tijaabada la ekaanshaha (kursiga seat belt fit test). Suunka dhabta ah waa inuu ka hooseyo simaha kan garabkana waa inuu si dadban uu xabadka u dhaafto garabkana uu nafaas yeesho. Caruurta badankooda ma la eka suumanka kursiga gaariga illaa ay ka gaaraan da'da sideedaad ama tobanaad, ugu yaraan dhererka uu yahay afar cagood iyo sagaal inji.

2) Kursiga kor loo qaaday waxaad dhigtaa kursiga dame ee gaariga.

- Kursiga gaariga ee kor loo qaaday ku rakib meesha dhexe ee leh suumanka dhabta iyo garabka. Kuraasida kor loo qaaday lala isticmaali karo suumanka dhabta kaliya. (Fadhiga hore ee rakaabka wuxu noqon karaa fursad doorasho haddii fadhiga dambe uu leeyahay suunka dhabta kaliya) Gawaarida suunka dhabta leh kaliya.
- Kursiga gaariga ee kor loo qaaday u jeedi dhinaca hore ee gaariga.
- Eeg waxa ku qoran kursiga kor loo qaado hoostiisa, buugga kursiga kor loo qaado iyo kan gaarigaba tilmaam-bixinno ka eeg.
- Kursiga kor loo qaadayo ku toosi si uu cunugga isaga oo toosan ugu fariisto – sawirka eeg.

3) Ilaamaha kursiga kor loo qaaday suunka kula xir.

- Suumanka dhabta iyo kuwa garbaha si dadban cunuga ugula xir kursiga iyo suumanka ammaanka kula xir.
- Ku toosi suumanka dhabta si ay cunugga nafaas u siiyaan oo si dadban u maraan lugaha kore ee cunugga, oo aysan ahayn inay caloosha maraan.
- Ku toosi suumnaka garabka oo garabka ku sax kursiga kor loo qaaday haddii loo baahdo. Qaybta garbaha eesumaanka garabka waa inay waasac ahaadan oo si babcan laga bilaabo garabka illaa barta simaha.

Kursiga kor loo qaado kula xir suunka marka aad safar ku jirtid xitaa hadduusan cunug saarnayn.

Laga soo xigtay: Maamulka Ammaanka Gaadiidka Waddoyinka Qaranka, Waaxda Gaadiidka Maraykanka (National Highway Traffic Safety Administration, U.S. Department of Transportation)

Sida loo sameeyo fiidiyaha ka eeg: “Booster Seats for Your 4- to 8-year-old Child” (*Kuraasta Kor loogu qaadayo ee loogu talagalay 4-8 Canugga jirka*). Lagala xariirayo <http://www.chop.edu/carseat>